

## **Su'aalaha Badanaa La Isweydiyo ee Gelitaanka Dugsiga Xannaanada (EEKG, Early Entrance to Kindergarten) Xilli Hore:**

### **Goorma ayuu hawsha EEKG bilaabmi doonaa sannad dugsiyedka 2023-2024?**

Foomamka gudbinta ee waalidiinta si ay u buuxiyaan qiimaynta ilmahooda ee EEKG waxa lagu soo dhejin doonaa Maars 13, 2023 websaydka WCS Gifted Education. Codsiyada waxaa la soo gudbin karaa inta u dhaxaysa Maars 13, 2023 iyo Maajo 15, 2024.

### **Goorma ayay qiimaynada dhacaan?**

Qiimayntu waxaa joogi doonaa dhakhtarka cilminafsiga ee Dugsiyada Westerville dhammaadka Meey iyo horraanta Juun.

### **Maxaa kamid ah geedi-socodka qiimaynta?**

Qiimayntu waxa ay ka kooban tahay imtixaan lagu samaynayo garaadka halkaas oo ardayda lagu qiimayn doono iyada oo la isticmaalayo imtixaan heer qaran sida uu ku taliyay Miisaanka Dardargelinta Iowa. Ardaydu waa inay muujiyaan kartida garaadka horumaray iyo sababta loogu tixgalinayo gelitaanka xilliga hore. Xirfadaha dhaqdhaqaaqa iyo qiimeyn ta bulsho-wadaaga waxay sidoo kale u ogolaataa dhakhtarka cilmi-nafsiga iyo kooxda qiimeyn ta sawir ballaaran oo cunuga si ay u qiimeyeen u diyaargarowga dugsiga xanaanada.

Gelitaanka xilliga hore waa in loo arkaa hab lagu daboolayo baahiyaha ilmaha. U diyaargarowga korriinka ee ilmaha ayaa muhiim u ah go'aaminta ku habboonaanta gelitaanka xilliga hore ee ilmaha. Xataa haddii ilmuu muujiyo karti xooggan, isaga/iyada waxa laga yaabaa in aanay u ahayn arday wanaagsan oo gelitaan xilliga hore. Waa muhiim in sidoo kale la tixgeliyo bisaylka bulsheed ee ubadka, korriinka shakhsi ahaaneed, iyo korriinka dhaqdhaqaaqa. Gelitaanka xilliga hore waxaa loogu talagalay ilmaha gaarka ah ee labadaba diyaar u ah tacliin ahaan iyo sidoo kale koriinka baaluq marka la barbardhigo kuwa kale da'diisa taariikheed.

## **Ma ka diiwaan galin karaa ilmahayga Dugsiga xanaanada ka hor nidaamka qiimaynta EEKG?**

**Maya.** Diiwaangelinta dugsiga xanaanada waxay u furan tahay oo keliya carruurta da'da u qalma gelitaanka dugsiga xannaanada Ogosto. Isdiiwaangelinta hore looma aqbali doono ardayda aan da'doodu 5 jir ahayn marka la gaadho taariikhda ugu danbaysa ee ay degmadu go'aamisay. Ardayda gala xilli hore dugsiga xannaanada carruurta waa inay ku aflaxaan nidaamka qiimaynta ka dibna kooxda Dugsiyada Hoose waxa ku gelin doona barnaamij maalin badhkeed ah.

## **Dugsiga xannaanada ee maalinta dhan ma yahay ikhtiyaarka ardayda loo arko inay u qalmaan gelitaanka dugsiga xannaanada xilli hore?**

**Maya.** Marmar dhif ah oo uu ilmuu u qalmo gelitaanka dugsiga xannaanada xilli hore, isku-duwaha waxbarashada hibada leh ayaa ardayga geyn doona dugsiga ugu dhow guriga ardayga kaas oo leh fasalo dugsiga xannaanada oo furan AM ama PM.

## **Maxaa MUHIIM ah in laga ogaado habka EEKG?**

**Carruur aad u yar ayaa u qalma gelitaanka dugsiga xannaanada xilli hore.** Fadlan hubi inaad sii waddo qabanqaabada daryeelka ilmaha si lama filaan ah. Haddii aad dooranayso barnaamijka barbaarinta, fadlan fahan in barnaamijyadani ay si dhakhsu ah u buuxsamaan. Fadlan u diwaangeli ilmahaaga sida caadiga ah, laakiin u sheeg dugsiga barbaarinta in ilmahaaga laga baarayo gelitaanka xannaanada xilli hore.